



Naga Caawi Sidii aanu u Abuuri lahayn Dugsiga Dhexe ee Kellogg ee Cusub

Raadinta Ka qayb qaadashada Bulshada ee Naqshadeynta Kellogg Cusub

Ka dib xeerkii maalgelinta daymeed ee 2017-ka, PPS waxay hore u sii wadaa qorshaynta, naqshadeynta iyo dhismaha Dugsiga Dhexe ee Kellogg ee cusub. Dhismaha hada jira ee 100-sano jirka ah ee Kellogg, kaasi oo aan loo isticmaalin dugsi ahaan tobankii sano ee la soo dhaafay, meesha ayaa laga saari doonaa dib ayaana loo dhisi doonaa. PPS waxay raadinaysaa talooyinka dadweynaha oo ku saabsan sida ay tahay in Kellogg cusub loo naqshadeeyo isla markaana waxay raadinaysaa tabarucayaal ku soo biira Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Kellogg (DAG)

Ku soo biir Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Kellogg (DAG)

Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Kellogg waxaa ka mid ah waalidiinta, macallimiinta, ardayda, iyo wakiilada bulshada kuwaasi oo ku lug yeelan doona horumarinta naqshadeynta Dugsiga Dhexe ee Kellogg ee cusub. Kooxda waxaa ka mid noqon doona ugu yaraan hal xubin oo oo matalaya mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda: waalidiinta dugsiga dhexe, waalidiinta xaafada, ururada xaafada, ururada ganacsiga, barnaamijyada dugsiga, goobta suurtagalka ah iyo/ama hawl wadaagayaasha lacageed, ardayda, iyo macallimiinta iyo wakiilka guddiga dugsiga.

Hawsha Kooxda La Talinta Naqshada


Ujeedada DAG waa horumarinta qorshaha weyn ee dhismaha dugsiga iyo qaabeynta naqshada oo dhammaystiran, sinnaansha leh, isku-dhafaan isla markaana leh aragti iyada oo la kaashanayo ka qayb qaadashada bulshada dugsiga ee dhabta ah. Xubnaha waxaa laga fili doonaa in ay shaqeeyaan dhowr bilood inta lagu jiro nidaamka qorshaynta.

Kellogg DAG kuma lug yeelan doonto Wadahadalada Xuduuda Dugsiga Dhexe ee Kellogg

Kellogg DAG waxay ku koobnaan doontaa qorshaynta iyo naqshadeynta Dugsiga Dhexe ee cusub kamana hadli doonto wadahadalada xuduuda iyo go'aamada socda ee Degmada u goonida ah. Wadada la marayo iyo xuduudaha Dugsiga Dhexe ee Kellogg wali lama dejin isla markaana go'aanada xuduuda lagagama hadli doono kulamada DAG. Dhammaan bulshooyinka u dhow waa lagu martiqaadayaa in ay ka qayb qaataan nidaamka naqshadeynta, laakiin ka qayb galkaagu ma saameyn doono go'aanada xuduuda dugsiga.

Ka qayb qaado isla markaana La socio Waxa jira

Ku soo biir Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Kellogg, codsiga halkan ka soo minguuri 'download': <http://www.pps.net/KelloggBond> Haddii aadan awoodin in aad ku biirto DAG, waxaad weli fursad u heli doontaa in codkaaga lagu dhageysto Kulanka Nashqadeynta Dadweynaha ee Kellogg ee soo socda. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo macluumaadkii u dambeeyay booqo website-ka mashruuca <http://www.pps.net/KelloggBond>. Ku soo biir liiska boostada ee mashruuca Kellogg KelloggBond@pps.net.



BARNAAMIJKA MAALGELINTA DAYMEED EE DUGSIYADA DADWEYNAHA PORTLAND

<http://www.pps.net/KelloggBond> • 503-916-2222 • www.facebook.com/pps.homepage • [@PPSConnect](https://twitter.com/PPSConnect)

Dugsiyada Dadweynaha Portland waa kuwo taageera dadka laga tirada badan yahay iyo shaqo bixiye loo wada siman yahay